

Warbixin ku socota waalidka xannaanooyinka carruuraha

Ka hor intaan xannaanooyinka carruuraha ee Norway la xirin carruurta xannaanooyinka carruuraha laguma arag wax cudur faafa ah oo la kala qaadayo. Marka dadka waaweyn loo barbardhigo way yar yihiin carruurta cudurka qaadda Norway iyo adduunka intiisa kale labadaba. Ilaa iyo hadda waxay u muuqataa in ay aad u yar tahay khatarta ay carruurta iyo dhallinyaradu ugu jiraan in ay aad ula xanuunsadaan fayraska koronaa. Taas oo ka yar xanuunnada kale ee hawamareenka ee carruurta ku dhici kara, tusaale ahaan hargabka iyo fayraska RS.

Ammaan bay u tahay in ay carruurta aadaan xannaanada carruurta

Si loo xaddido kala qaadista cudurka ayaan hawlgallo badan hadda ka billowday xannaanada carruurta. Muddada soo socota waxaan si dheeri ah uga taxaddari doonnaa in aan si wanaagsan uga hor tagno kala qaadista cudurrada. Taas oo ku xiran in aan kulligeen dadaal muujinno oo aan u hoggaansanno talooyinka cusub. Waxaan xannaanada carruurta si gaar ah isha ugu hayn doonnaa:

- in gacmaha la dhaqdo oo carruurta lala socdo si ay si wanaagsan ugu bartaan gacmadhaqashada
- in ay nadaafadda xannaanada carruurta wanaagsanaato
- qalabka lagu ciyaaro oo joogto loo dhaqo
- in muddada soo socota wakhtiyada dheeri ah carruurta bannaanka loo saaro
- ay yaraadaan inta carruur ah ee la jooga shaqaalaha joogtada ah

Xannaanada carruurta weli sideedii ayay carruurta u daryeeli doontaa

Weli waan ka taxaddaraynaa baahida ay carruurta u qabaan daryeelka jireed, annaga oo hubin doonna in ay dhammaan carruurta xannaanada carruurta ku dareemaan ammaan, ka-midahaasho iyo ka-helitaan. Istareexidda iyo laabqaboojintu weli muhiim bay u yihiin carruurta.

Haddii aysan fiicnayn xaaladda caafimaad ee ilmahaagu

Haddii ay ilmahaaga ka muuqdaan calaamado jirro, xataa haddii ay yihiin calaamado fudud, markaas ma imaanaysaan xannaanada carruurta. Wakhtigaan hadda lagu jiro aad ayay muhiim u tahay in uu ilmuhu habeen iyo maalin guriga sii joogo kaddib markii ay calaamadihii ka baabba'een. Waalidka isku arka calaamado xanuun marinna hawada ka haya, ilmaha ma keenayaan ka mana qaadayaan xannaanada carruurta. Haddii waalidka ama dad kale oo guriga wax ka deggan laga helay cudurka fayraska korona, markaas na ma imaanaysaan xannaanada carruurta. Haddii uu ilmuhu ku xanuunsado xannaanada carruurta, waa in aad sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah u kaxaysaan.

Looma baahna in ay waalidku xannaanada carruurta soo galaan

Ilaa iyo inta ay suurtagalka tahay waxaan isku daynaa in aan carruurta bannaanka idinkaga qaanno. Carruurta marka ay xannaanada carruurta imaanayaan waa in ay qabaan dharkii dibedd.

Waxyaalaha lagu ciyaaro ha ka soo qaadan guriga

Looma baahna in ay carruurta waxyaalaha lagu ciyaaro guriga ka soo qaataan. Haddii uu ilmaha ugu leeyahay boombale uu ku seexo, kaas waad u soo qaadi kartaa. Laakiin waxaa aad muhiim u ah in aysan la wadaagin ilmaha kale ee xannaanada carruurta.

In gacmaha layska dhaqo waa muhiim guriga iyo xannaanada carruurta labadaba. Gacmaha iska dhaqo ka hor intaydnaan imaan xannaanada carruurta, iyo isla marka aad guriga tagtaan ba. Waxaan carruurta ku boorrinaynaa in aysan carruur kale oo badan dhex gelin xilliga ay firaaqada yihiin, iyo in ay weliba bannaanka ku ciyaaraan.